




PreK 4 ME Family Links

**CUTUBKA 6: WAXYAABAHA KORA**


**Dulmarka Cutubka 6: Waxyaabaha Kora**

*Gu'gii ayaa da'ay waana xili aad u xiisad badan fasalkeena! Waxaan adeegsanaynaa xirfadaheena sayniska si aad wax uga barano sida geedaha iyo xayawaanadu u koraan. Laga bilaabo miro ilaa geed ay ka noqdaan, waxaan baranaynaa beeraha ku yaala aduunka. Inta lagu jiro cutubkaan, waxaan hubin doonaa kobaceena gaarka ah ilaa sanadkaan oo dhan—anagoo isku xirayna xirfadaheena iyo fikradaheena aan ka baranay sanad dugsiyeedka. Waxaan sidoo kale sii wadaynaa inaan ka shaqayno xirfadaheena laxamaynta iyo wax tirinta, aana u diyaar garoowno u guurista carruurteena dugsiga barbaarinta!*


**BUGAAGTA MURAAJACADA ee Cutubka 6**



*The Ugly Vegetables*  
Oo ay qortay Grace Lin



*Community Soup*  
Waxaa qoray Alma Fullerton



*Chickens Aren't the Only Ones*  
Oo uu qoray Ruth Heller



*Zinnia's Flower Garden*  
Waxaa qoray: Monica  
Sawiro lagasoo qaaday Amazon.com

**Ciwaannada kale ee aan akhrinayno: Make Way for Ducklings**

Oo uu qoray Robert McCloskey

**Animals Born Alive and Well**

Oo uu qoray Ruth Heller



Sawir lagasoo qaaday Pixabay

**Heesaha, Ciyaarta Erayga iyo Xarfaha**

*U akhri gabaygaan ilmahaaga. Waydii inay heli karto erayo kale oo laxan la samaynaaya erayada gabayga ku jira!*

**KOOBABKA SUBAGA IYO UBAXYADA**

Koobabka subaga iyo ubaxyada,

Alla, ubaxu qurux badanaa!

Waxay soo baxaan xiliga gu'ga,

Ayagoo lasoo baxa roobka xiliga gu'ga.

Miraha iyo caleemaha ayaa bilaaba inay soo baxaan,

Isbadal ayaa soo socda.

Koobabka subaga iyo ubaxyada

Gu'ga ayaa ka da'ay meel kasta!



Sawir lagasoo qaaday Pixabay

**Arag bogga kale si aad u aragto nashaadaadka**



# Waxbarashada leh Nashaadaadka Dheeraadka ah Gee Guriga!

## Heerarka Xisabata, Qaababka Loo Waajaho Waxbarashada

### Tirin waxyaabaha guriga yaala

Tani waa hawl fudud oo baashaal leh oo aan u baahnayn wax alaabo ah! Dooro alaabaha guriga yaala (albaabada, daaqa-daha, roogaga, iwm.) una sheeg ilmahaaga inuu tiriyo! Waxaad ka hadli kartaa waxyaabaha qaar badan yaalaan iyo kuwa waxyar ka yaalaan.

## Fanka, Kobaca Jirka, Xisaabta

### Sometimes I'm Small

Kani waa gabay aan ku barno ilmaha fasalka inta lagu jiro cutubka:

**Sometimes I'm small** (hoos u foorarso oo jirkaaga yaree)

**Sometimes I'm tall** (Istaag oo kor iskukala bixi)

**Small (Isa soo god)**

**Tall (Istaag oo iskala bixi)**

## Heerarka Fanka, Luuqada, Bulshanimada iyo Dareenka iyo Qaababka loo waajahaayo Waxbarashada

### Waxay ku Bilaabataa Ugaarsi

5 xaraf ku qor warqad. Waydii ilmahaaga inay garanayso dhawaaqyada xarafka. Kadibna, aaga guriga, fiiri in ilmahaagu ay heli karto alaabaha ku biloowda dhawaaqyada xarfaha. Waxaad u baahan kartaa inaad xasuusiso dhawaaqyada!



Sawir-lagasoo qaatay Pixabay

### Kalmar ku socota qoysaska iyo daryeelayaasha:

Marka sanadkeenu bilaabo inuu sii dabayshado, waxaan biloownaa inaan sugno xagaaga iyo ilmahaaga oo u gudba dugsiga birimada. Halkan waxaad ka helaysaa dhawr tilmaamood oo aad ku caawin karto ilmahaaga (iyo naftaada!):

- ◆ Booqo dugsiga sida ugu dhakhsaha badan ee aad awoodo xiligaan xagaaga. Haddii dugsigaagu baxsho maalmaha booqashada, iskuday in ilmahaagu ka qaybgalo. Haddii fasalka barimada ee cunugaagu baxsho jadwalka maalinlaha ah ee nashaadaadka xili danbe la samayn doono, la fiiri wiilkaaga ama gabadhaada. Sawiro ka qaado dugsiga, fasalka, iyo macalinka cusub, hadday suuragalayso
- ◆ U sheeg ilmahaaga sida aad dareentay markii aad aaday dugsiga birimada—iyo waxa dareenka wanaagsan ku siiyay iyo sida ay xaaladu caadi ku noqotay (taasi waa haddii aad xasuusan karto!)
- ◆ U akhri ilmahaaga xog ku saabsan bilaabida fasalka birimada.